Galmo Uga faa'iideysiga Caruurta

Galmo uga faa'iideysigu waa sharci daro iyo fal dembi ah. Galmo uga faa'iideysigu waa marka qof uu weydiisto ama uga ganacsado si loogu galmoodo iyada oo looga bedelanayo hadiyado ama ogolaansho, ama alaabooyin sida cunto, guri dejin, mukhaadaraad, aalkolo. Ama lacag. Galmo uga faa'iideysiga caruurtu waa marka qof weyn oo madax ah ama meel mas'uul ka ah- sida qaraabada, macalinka, wasiirka, ama qareenka- uu kaga faa'iidaysto qofka yar, qofka aadka u dayacan (kana yar da'da 18) ula jeedooyin galmo. Galmo uga faa'iideysiga waxaa ka mid ah taabashada qayb ka mid ah jirka qofka yar ama in la weydiisto qofka yar in uu taabto qofkale jirkiis ulajeedooyin galmo awgeed.

Yaa Galmo looga Faa'iideystaa?

Dadka yar yar badankiisa oo ah dhibanayaasha galmada looga faa'iideysto waa dumarka, laakiin wiilasha xataa galmada waa looga faa'iideystaa. Badan kood waxaa soo maray khilaaf qoys, caadaysiga mukhaadaraadka ama in lagu xadgudbo caruurnimadooda sida in la dayaco ama xadgudub loo galmooda ama jidhka ah. Kuwo badan ayaa guri la'aan noqday xili gaaban ama wakhti dheerba, waana badanaaba marka lagu guda jiro xiliyadaas ay guri la'aanta yihiin in dadka waaweeyn kaga faa'iideystaan si ay ugu galmoodaan.

Waa maxay da'da ogalaansho siinta ee loo galmoon karo?

Da'da ogolaansho siinta galmada ee Canada waa 16. Tani waa da'da qof la odhan karo waa qaan gaar ay ku samayn karaan go'aamadooda ku saabsan galmada. Inkastoo uu 16 sano jir uu ahaan karo qof weyn oo go'aan ku saabsan galmada samayn kara, weli maaha dad waa weyn. Manitoba qof waxaa la odhan karaa waa qof weyn da'da 18 jirka ah. 16 jirku wuu ogalaan karaa in uu u galmoodo qof weyn hadii keliya qofka weyni uusan ahayn mid madax ah ama mas'uuliyad haya. Waa sharci daro in qof weyn oo meel madax ka ah ama mas'uul uu u galmoodu qofkasta oo ka yar 18 jir. Waa mas'uuliyad saaran qofka weyn in uu raaco sharciga.

Maxaa dhacaya hadii lagugu helo dembi ah Galmo Uga faa'iideysiga Caruurta?

Hadii lagugu xukumo dembi ah in aad galmo uga faa'iideysatay ilmo ka yar 16 waxaa aad gelaysaa xabsiga ilaa mudo 10 sano ah, waana lagaa masaafurin karaa Canada. Dabeecadaadu waxa ay saameyn ku yeelanaysaa qoyskaaga iyo sumcada bulshadaada ama jinsiyadaada. Boolisku waxa uu magacaaga gelinayaa Child Abuse Registry database (*meesha diiwaanada lagu xafido Dadka ku xadgudba Caruurta)* meeshaas oo qof walba uu ka arki karo. Waxa aad ku noolaan doonta fadeexad noloshaada oo dhan waxaana dhib kugu noqon doonta sidii aad u heli lahayd shaqo ama aad u heli lahayd meel aad ku noolaato.

Waa maxay cawaaqibka caafimaad?

Ilmo galmo looga faa'iideystay waxaa ku dhici kara sexually transmitted infections (STIs) *cudurada galmada la isugu gudbiyo* ama Human Immunodeficiency Virus (HIV) (*fayraska*

daciifiya difaaca bini'aadamka) hadii aad galmo samayso cinjirka galmada la'aantiis, ilmuhu waxa uu kugu ridikaraa jeermiska, ama ilmaha waad ku ridi kartaa jeermiska cudurada galmada la isugu gudbiyo. Hadii aad qabto ama aad ugudbiso cudurada galmada lagu kala qaado, taasi waxa ay aad usahlaysaa in uu kugu dhaco HIV. HIV waxa uu sababaa AIDS, daawana maleh cudurka AIDS. Hadii aad qabto cudurka AIDS xataa ma ogaan kartid cudurka sababtoo ah mayeelaynaysid wax calaamado ah. Xataa hadii aadan calaamado lahayn, waxa aad ku faafinaysaa jeermiskaas dadka kale ee aad u galmooto, odaygaaga ama xaaska, ama xataa caruurtaada mustaqbalka.

Maxaad samaynaysaa hadii aad umalayso in qof uu galmo uga faa'iideysanayo caruur?

Waa mas'uuliyad ka saaran qof kasta oo weyn in uu ka ilaaliyo caruurta si aan galmo looga faa'iideysan. Hadii aad ka walwalsan tahay in caruur galmo looga faaiideysanayo ama dhib loogaysanayo, waa in aad soo wargelisaa welwelkaaga booliiska, ama Child and Family Services (Adeega Ilmaha iyo Qoyska) ama qaybta cudurada galmada la isku qaadsiiyo ee bukaan socod eegtada caafimaadka. Magaacaaga in aad usheegto uma baahnid ama warbixinta aad siisana waxa ay noqondoontaa mid qarsoodi ah. Hadii aadan hubin sida aad welwelkaaga usoo wargelinayso, la hadal lataliye una sheeg in ay ku caawiyaan

Dhaqdhaqaaq yadan soo socda waa sharci daro. Waa in aad la xiriirtaa booliska hadii:

- Aad aragto qof weyn oo jidka ku weydiisanaya qof ka yar 18 sano dhaqdhaqaaqyo galmo la xiriira
- Aad ogtahay shakhsi caruur in loo galmoodo u iibinaya (fataal)
- Aad hesho sawiro caruur dhib loogeysanayo(masawiro caruur qaaqaawan) oo internetka ku jira
- Caruur internetka loogala xiriiray ulajeedooyin galmo awgeed
- Aad hesho bog internetka ah oo gacan ka geysanaya in loo safro ulajeedo ah in caruur galmo looga faa'iideysanayo
- Aad ka shakido guri deriskaaga ah oo loo isticmaalayo si galmo looga faa'iideysto caruurta
- Aad ogtahay in caruur ay ka faa'iideysanayaan qoyskiisa ama qoyskeeda, iskuulka, ama meelkasta oo kale

Waxaad ku soo warbixin kartaa internetka dhaqdhaqaaq yadan sharci darada ah www.cypertip.ca telefoon usoo dir booliska Winnipeg 986-3464, ama email usoo dir wps-vice@winnipeg.ca wixii akhbaar dheeraad ah oo mawduucan ku saabsan eeg www.stopsexwithkids.ca